

IIB MA GALE

F'AAFINTA RASMIGA AH

الرسمية



الجريدة

Sannadka 13aad 13ka Sept. 1985 L. 1 R. 9

JAMHUURIYADDA DIMOQRADIYADA SOOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

F'AAFINTA RASMIYAH

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba -- **RUKUNKA:** Sanaadii waa Sh. 100 Soomaa iya gudeheeda - dibadedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoritaanku F R halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O C E N T E R

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

QAYBTA

LABAAD

W. M.

XEER

XEFR-SHARCI L. 4 ee 15 Agoosto 1985.

Wax ka beddelidda Sharciiga Nidaamka Dhismaha Dawladda.

og; 654

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 31 15

Agoosto 1985, Magacaabid Wasiiro

» 657

QAYBTA

SAD/ZAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIS IWM.

WASAARADDA WARSHADAH, 3.9.85,

Sumadaha Ganacsiga, AARAN L. 365

» 653

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 5.9.85,

Jeg. Yar. L. 283616 ku qoran Nuur Cis-

QAYBTA

LABAAD

XEER

Xeer Sharci Lamb. 4 ee 15 Ago. 1985 Wax ka bedelidda
Sharciga Nidaamka Dhismaha Dawladda

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharci Lambar 49 ee 23ka Disemb.
1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka JDS

MARKUU ARKAY: Sharci lamb. 14 ee 3 Juun 1962,
kuna saabsan Nidaamka Dhismaha Dawladda, iyo
Beddelaadyadii ka dambeeyey.

MARKUU ARKAY: Baahida Culus, degdega ahna ee
loo qa'bo in Wasaaradda Maaliyadda loo kala saro
laba Wasaaradood.

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA: Xeerka Sharci ee soo socd

Qodobka laad

Dhismaha Wasaaradda

Waxaa la abuuray Wasaaradaha soo socda:

1. Wasaaradda Maaliyadda iyo
2. Wasaaradda Lacagta:

Qodobka 2aad

Wasaaradda Maaliyaddu waxay qabanaysaa xilalka
soo socda

- Talo ka soo jeedinta siyaasadda ee Dalka iyo kormeeridda arrin kasta ee maaliyad ku lug leh.
- Dersidda iyo abaabulka shuruucda iyo xeerarka la xiriira maaliyadda iyo u hawlgalka horumarinteeda
- Diyaarinta Miisaaniyadda ku talo galka iyo midda Xisaabxirka.

— Hubinta habsami u fulinta kharigada miisaani (d

- Qaranka.—
- U jihaynta lacaga dibedda si waafaqsan siyaasadda Guud ee Qaranka iyo nidaamka Bankiga Dhexe.
 - La socodka xaaladaha lacagaha adduunka.
 - Sahminta iyo talo ka dhiibashada ilaha dhaqaale ee Maalgelinta ku habboon.—
 - U hawigalka kobcinta dhaqaalaha Guud ee dalka.
 - Talo ka dhiibashada shuruucda iyo heshiisyada caalamiga ah ee uu ka dhalanayo cunays lacageed.
 - Maalgelinta amaahyada iyo deeqaha dibedda, ha ahaadeen lacag ama badeeco hubinta heli'aankooda iyo ku bixintooda meelbii loogu talo galay.

Qodobka 3aad

Xilka Wasaaradda Lacagta

Wasaaradda Lacagta waxay qabanaysaa xilalka soo socda:

- Xaqiijinta dhaqangelinta shuruucda Canshuuraha ee dalka.—
- Maamulka soo ururinta canshuuraha iyo dakhliyada kale ee Qaranka, nooc kasta ha ahaadeene, iyadoo loo marayo hababka ku tiimaaman shuruucda iyo Xeerarka.—
- Diyaarinta ku talo galka dakhliga ee saldhig u noqonaya Miisaaniyadda ku talo galka.
- Ka baaraandegidda shuruucda iyo xeerarka u ballan qaadaya dakhli khasnadda Qaranka iyo talo ka soo jeedinta horumarinta ilaha dakhliga.
- Hawigelinta iyo kormeerka hay'adaha Qaranka ee loo dhisay dakhli soo gelin iyo kuwa u xilsaaran ilaalinta Canshuuraha.

Talo ka dhiibashada shuruucda iyo heshiisyada caa

— U hawlgalka sare u qaadidda garaadka dadweynaha xagga gudashada waajibka Dastuurka ee canshuur bixinta.

Qodobka 4aad

D h a q a n g a l

Xeerkan Sharci wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana loo gudbi-nayaa Golaha Shacbiga Qaranka si loogu rogo sharci.
Muqdisho, 15 AUG. 1985

Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA J.D.S.